Qoyska Xaanshida Xaqiiqada

# Natiijada Aan kala Cadeyn:

## Ogeysiinta Natiijada Dhiigga Laga Qaaday Ciribta

Barnaamijka Baaritaanka ilmaha dhasha ee Minnesota

**Borderline Elevation of TSH, Family Fact Sheet—Somali**

# Kor u Kaca aan Kala Cadeyn ee Hoormoonka Maamula Qanjirada Hunguriga (TSH)

## Maxaa lagu ogaaday baaritaanka dhallaanka cusub?

Baaritaanka ilmaha dhashay oo la sameeyay ayaa lagu ogaaday in ilmahaagu qabo heerarka xoogaa sareeya ee TSH.

## Maxay tani ka dhigan tahay?

Kor u kaca aan kala cadeyn ee TSH waa kuwo caadi ah ilmuhuna inta badan waa mid caafimaad qaba. Hase yeeshee, waxaa suuragal ah, in ilmahaagu qabo xanuunka qanjirada (congenital hypothyroidism, CH). CH waa nooc kamid ah xanuunka ku dhaca canjirada. Natiijada Aan kala Cadeyn ayaa ka dhignayn in ilmahaagu qabo ciladaha canjirada, laakiin baaritaan ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo.

## Maxaa xiga oo dhici kara?

Dhakhtarka ilmahaaga ayaa dalban doona baaritaan dheeraad ah. Inta badan waxaa jiri doona labo dhiig oo lagu qaadi doono rugta caafimaadka ilmahaaga si loo baaro.  Labadaan shaybaar waxaa la yiraahdaa TSH iyo free T4 (thyroxine). Waa suuragal inuu dalbado baaritaanka labaad ee ilmaha dhashay. Inta badan baaritaanka ku celiska ah ma sheego wax cilad ah.

Haddii natiijada kasoo baxda baaritaankaan dheeraadka ah caadi yihiin, looma baahna baaritaan ama daawayn kale.

Haddii natiijooyinka baaritaankaan dheeraadka ah muujiyaan wali heerarka sareeya, dhakhtarka ilmahaaga ayaa kuu sheegi doona baaritaanka dheeraadka ah ama daawaynta loo baahan yahay. Waa in laguu gudbiyaa dhakhtarka Qanjirada Gudaha ee Carruurta kaas oo daaweeya carruurta qaba xanuunnada qanjirada.

## Waa maxay xanuunka qanjirada (congenital hypothyroidism (CH)?

CH waa xanuun ilmuhu ku dhashaan kaas oo sameeyaa qanjirada hunguriga, oo ah xubin yar oo ku taala dhuunta. Qanjirada hunguriga ayaa abuura hoormoonka hunguriga. Dadka qaba CH ayaan awoodin inay abuuraan hoormoonka hunguriga oo ku filan. Hoormoonka hunguriga ayaa loogu baahan yahay kobaca iyo koriimada caafimaadka leh.

## Waa maxay dhibaatooynka caafimaad ee uu keeni karo?

CH waa xanuun oqfku waligiis la noolaanaayo. Haddii aan la daaweyn, wuxuu sababi karaa:

- Juudaanka (maqaarka ama qaybaha cad ee indhaha oo jaalle noqda)
- Awooda murqaha oo daciifta
- Naafada waxbarashada
- Dib u dhaca kobaca iyo kororka miisaanka

Carruurta qaba CH ayaa ka faa'iideysan kara daawaynta degdega ah ee taxadarka badan.

## Waa maxay fursadaha daaweynta ee jira?

Inkasta oo aan CH daawo lahayn, haddana waa la maarayn karaa. Daawada ugu fiican ee CH waa daawo badel u noqonaysa hoormoonka hunguriga ee ciladaysan. Haddii la daweeyo kahor inta aan astaamuhu soo muuqan, ilmaha ayaa heli kara kobac iyo koriimo caafimaad leh.

Ilmaha qaba CH waa inay u tagaan dhakhtarkooda caadiga ah iyo dhakhtar ku taqasusay xanuunka hunguriga (dhakhtarka qanjiradA).

## Dhigaalada

**Tixraaca Macluumaadka Hiddo-sidaha:**
http://ghr.nlm.nih.gov

**Badbaadi dhallaankaaga Adoo U Maraya Baaritaano Aasaasi ah:**
www.savebabies.org

**Baaritaanka Koowaad ee Dhallaanka:**
www.babysfirsttest.org